

Furitaanka Liiska Sugayaasha Guryaynta!



Guryaynta Dakhliga Hoose ee Tacoma Liiska Sugayaashu Waxay Furmayaan Oktoobar 7-18, 2019

Maamulka Guryaynta Tacoma waxay kusoo casuumayaan dadka u qalma inay dalbadaan barnaamijkeeda guryaynta la awoodo. Waxaanu bixinaa laba nooc oo guud oo kaalmo guryayn ah: guryo la awoodo oo kiro ah, ama fagtuur dadku ay kirada iskaga bixiyaan Tacoma. Waxaan aqbalnaa arjiga:

8 subaxnimo Isniin, Oktoobar 7 ilaa 5 galabnimo Jimce, Oktoobar 18, 2019.

Waxaa jira liis sugayaal ah oo qoysas ay ku jiraan dad 3 ruux ama ka badan

Waxaad u Baahan Tahay Si Aad U Dalbato:

- Magacaaga sadexan iyo macluumaadkaaga aas aasiga ah ee dhamaan xubnaha qoyskaaga
- Cinwaan iimeel oo shaqaynaya
Waxaad ka samaysan kartaa iimeel gmail.com ama outlook.com.
- Dakhliga sanadkii ee qoyska oo dhan
- Lambarka Amniga Qaran ee dadka waawayn (18 ama kawayn) kuwaas oo leh

Ka dalbo:
[Tacomahousing.net/waitlist](https://tacomahousing.net/waitlist)



Igu sawir kaameeradaada taleefanka ama or App-ka Koodhka QR

Su'aalaha Caamka ah

Ma u Qalmaa Inaan Dalbado?

Qoysku waa inuu leeyahay sadex ama ka badan oo dad ah oo u qalma inay dalbadaan liiska dadka sugayaasha ah.

Maxaa liiskan kaliya loogu gaar yeelay qoyska sadex qof ama ka badan ka kooban?

Liiskeena dadka sugayaasha wakhtigani waxa uu leeyahay qoysas faro badan oo aad u tiro yar oo weli sugaya. Liiskeena dadka sugayaashu waxaa fursadoodu badan tahay qoysaska balaadhan, taas oo ah sababta aanu ugu furnay qoysaska leh sadex ruux ama ka badan.

Ma in aan deganaadaa Tacoma si aad u dalbado? Maya.

Goorma iyo sideen u dalban karaa?

1. Online - Ka dalbo online ahaan Tacomahousing.net/waitlist. Tani waa dariiqa ugu dhakhsaha badan ee ugu wanaagsan ee lagu dalban karo.

2. Taleefanka - Lahadal (253) 448-2738, Isniin, Jimce, 9 subaxnimo - 5 galabnimo

3. Isaga oo qofku socda - Booqo xafiisyadaas Isniinta- Jimce inta u dhaxaysa 9 subaxnimo - 5 galabnimo

Hilltop - 902 South L Street, Tacoma, WA

Salishan - 1724 East 44th Street, Tacoma, WA

Waa inaad dalbataa inta u dhaxaysa **8 subaxnimo Isniin, Oktoober 7da ilaa 5 galabnimo, Jimce, Oktoober 18, 2019.**

Mar kasta oo aad dalbato wakhtigan ma saamaynayso fursadaada.

Ma dalban karaa wax ka badan hal mar mudadan arjiga?

Maya, marka aad dalbato, waxaad dalban kartaa inaad aad qof kasta ku qorto gurigaaga. Qof kasta oo liiska ku qoran ma dalban karo liiskan sugayaasha mar kale. Hadii aad gelin liiskaayaga dadka sugayaasha wakhtigan, waxaad isku dayi kartaa mar kale marka uu furmo liiska dadka sugayaashu.

Sidee ayaan ku ogaanayaa inaad hesheen arjigayga?

Hadii aad online ahaan ku dalbatay, waxaad heli doontaa lambarka cadaynta. Waxaa sidoo kale lagu soo diri doonaa iimeel uu la socdo arjiga la buuxinayo.

Goorma ayaad isgu soo warcelinaysaan?

Waxaanu rajaynaynaa inay nasoo gaadhi doonaan kumanaan arji. Bakhtiyaasi nasiib ayaa markaa lagu soo xulayaa ilaa 1,200 oo qoys oo galaya liiska dadka sugayaasha. Taasi waa tirada aanu u adeegi karno ilaa labaadii sano. Waxaanu u gelinaa liiska sugayaasha oo aanu u kala horeysiinaa nasiib. Laga bilaabo Noofembar 4, waxaanu la xidhiidhi doonaa dalbadaha oo waxaanu u sheegi doonaa hadii ay kusoo baxeen liiska sugayaasha iyo hadii kale.

Hadii aan galo liiska sugayaasha, maxaa xiga?

Hadii bakhtiyaasi nasiibku uu ku geliyo liiska dadka sugayaasha, waxaa laguusoo diri doonaa lambarka ku qorista. Marka magacaagu uguusoo sareeyo liiska, waxaanu eegi doonaa in aad u qalanto oo aanu xaqiijin doonaa. Hal shardi, iyo kuwa kale oo ku lamaan, waa in qoyska dakhligiisa sanadkii uu noqdo xadi ka yar:

TiradaDadka Qoyskaaga							
1	2	3	4	5	6	7	8
Ma Qalmo	Ma Qalmo	\$43,320	\$48,120	\$52,020	\$55,860	\$59,700	\$63,540

Hadii aad u qalanto, waxaanu ku siin doonaa ikhtiyaarka guryayntaayada la heli karo ee kowaad. Waxa ay noqon kartaa taasi:

1. Guri ku yaal mid kamid ah hantidaayada. Hadii ay taasi dhacdo, waa in aad aqbashaa meesha aanu ku siinay hadii ayna jirin sabab wanaagsan oo aad ku diidaa.
2. Waxaanu kuusoo bandhigaynaa inaan kaa bixino kirada Tacoma. Adiga ayaa dooranaya meesha aad ku noolaanayso.

Waxaanu aqbalaynaa arjiyada mar kale?

Waxay u badan tahay in aanu bilawno in aanu aqbalno arjiyada ilaa laba sano kadib. Waxaanu sugi doonaa ilaa liiska dadka sugayaashii ay soo yaraadaan kahor inta aanaan dad dheeraad ah ku darin.

Visit tacomahousing.org/notifyme oo is duwaan geli si aad u hesho iimeel marka liiska dadka sugayaasha ah dib loo furo.

Macluumaad Badan Ka Ogow: Tacomahousing.net/WaitlistFAQ